

Ilmahaygu ma u baahan yahay sanad labaad oo Kindergarten ah?



Dawlada Fiktooriya waxay siisaa kharaj kaalmayn ah carruurta tagta kindergarten-ka ka hor sanada aanay bilaabin dugsiga.

Waa muhiim in carruurta bilaabaan dugsiga markay diyaarka u yihiin inay wax ku bartaan bay'ad rasmi ah. Sidaas darteed muhiim ayay u tahay waalidiinta inay qadariyaan waqtiga ay saxda tahay in ilmahoodu bilaabo dugsiga – maadama waqtigaasi yahay waqtiga ugu saxsan in ilmuhu kindergarten-ka tago.

Ilmuhu waa tegi karaa sanad labaad kindergartenka, haddii baruho aaminsan yahay in ilmuhu qabo dib u dhac ugu yaraan laba meelood oo horumarkiisa la xiriira ilmuhuna ka faaiidaysanayo in lagu celiyo sanad labaad kindergartenka. Dhinacyada la eegayo waxaa ku jira isdaryeelida, awooda hadlida iyo/ama fahmida luqada, horumarka fahamka, koritaanka bulshanimu iyo koritaanka shucuurta. Waxaa laga yaabaa in dhinacya kalena la qadariyo.

Waxaa jira tusayaal mucayina oo macalimiinta iyo waalidiintu ay raacaan si ay uga caawinto inay gartaan ilmaha baahidiisa ayna abaabulaan hadafyo ku haboon ilmaha. Xaalladaani waxay u baahan tahay in waalidka iyo macalimku ay u wada shaqeeyaan si dhow una wada xiriiraan si sareexa ah. Waalidka raalinimadiisa iyo iyada oo waalidka lala tashanayo, macalimku marka hore wuxuu dhamaystiraa qiimayn, haddii loo baahdona wuxuu raadiyaa kaalmada mihnadlayaasha korida ilmaha (tusaale ahaan, Saraakiisha Rugta dugsiga ka hor) dabadeedna waxaa la diraa caddaynta xaq u yeellashada taas oo loo dirayo Xafiiska Qaybta ee Wasaarada.

Xasuuso

- Si taxadar leh uga feker marka ilmahaaga ay u badan tahay inuu diyaar yahay inuu bilaabo dugsiga, sidaas darteedna waqtiga ay tahay inay ugu fiican tahay inay noqoto in ilmuhu hello khibrada kindergartenka. Haddii aadan hubin, la hadal kuwa kale oo yaqaan ilmahaaga aadna aaminsan tahay aragtidooda.
- Tag fadhiga macluumaadka kindergarten, weydiina wixii ku saabsan barnaamijka kindergartenka.
- Ka hor iyo ka dib inta aanu ilmahaagu bilaabin barnaamijka kindergartenka, la wadaag baraha dareenkaaga, aragtidaada iyo fikradaha ku saabsan ilmahaaga, si saraaxa ah.
- Haddii aad u baahan tahay in wax lagu kala caddeeyo ama macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan waqtiga ay ugu fiican tahay in ilmahaaga la geeyo kindergartenka, la hadal ilmahaaga barahiisa, xiriiriyaha daryeelka ilmaha ama kalkaalisada caafimaadka ilmaha iyo hooyada.